# Qaban qaabada daryeelka waalidka ka dib kalamaqnaashaha ama furitaanka

Sharciyada khuseeya ilaalinta iyo marin-u-helidda ee waafaqsan *Xeerka Furriinka* way isbeddeleen markii ka cusub ee *Xeerka Furriinku* uu dhaqan galay Maarso 1, 2021.

## Qaban qaabada daryeelka waalidka ee amarada ama heshiisyada la gaadhay ka hor sharciga cusub inta aanu dhaqan gelin.

*Xeerka Furriinka* waxa uu leeyahay sharciyo gaar ah oo ku saabsan qaban qaabada daryeelka waalid ee waalidiinta is fura. Gobolada iyo dhulalka guud ahaan waxay leeyihiin sharciyo isku mid ah dhanka waalidka aan xaaska ahayn iyo waalidka xaaska ah ee kala maqan laakiin kuma habboona furriinka.

Si waafaqsan *Xeerka Furriinka* ee hore, qaban qaabooyinka daryeelka waalidka waxaa loo tixraacay sida "ilaalinta" iyo "marin-u-helidda." Marka isbeddelada *Xeerka Furriinka* la dhaqan geliyay Maarso 1, 2021, shuruudahan waxaa lagu beddelay luqad cusub oo xoogga saarta masuuliyadaha waalidka ee carruurtooda iyo hawlaha looga baahan yahay in la daryeelo carruurta. Sharciyada gobolka ama dhulku waxa uu isticmaali karaa erayo kale si loo tixraaco habbaynta daryeelka waalidka.

### Maxaa uu amarkaygii hore uga dhigan yahay *Xeerka Furriinka* cusub?

Haddii aad haysato amarka "ilaalinta" ama "marin-u-helidda" oo waafaqsan *Xeerka Furriinka* la sameeyey ka hor Maarso 1, 2021, **waxaad sii wadi kartaa inaad ku tiirsanaato amarkaaga jira**. Shuruudaha Xeerka cusub waxay kuu sheegayaan waxa amarka cusub macnahiisu yahay xagga Xeerka cusub.

| Ka hor Maarso 1, 2021 | Ka dib Maarso 1, 2021 |
|---|---|
| Ilaalinta | Go'aanka marin-u-helidda iyo wakhtiga daryeelka waalidka |
| Marin-u-helidda (xaaska) | Wakhtiga daryeelka waalidka |
| marin-u-helidda (aan xaaska ahayn) | Xidhiidhka |

**Wixii macluumaad ah ee ku saabsan "ilaalinta" iyo "marin-u-helidda" amarada waxaa wax looga qabtaa si waafaqsan sharciga cusub fadlan arag qaybta "Amarada daryeelka waalidka".**

### Beddelidda amarkayga

Haddii aad doonayso inaad beddesho ilaalintaada ama marin-u-heliddaada amarka la gaadhay ka hor Maarso 1, 2021, markaa sharciyada *Xeerka Furriinka* cusub waxa lagu dabaqi doonaa habayntaada daryeelka waalidnimo. Tusaale ahaan, haddii aad doonayso inaad beddesho amarkaaga maxkamadda si aad u beddesho wakhtiga waalid kastaa la qaato ilmaha, amarkaaga cusub waxa uu isticmaali doonaa erayga "wakhtiga daryeelka waalid" iyadoo maxkamaddu ay tixgelin doonto asbaabaha cusub si go'aan looga gaadho danta ugu fiican ee ilmaha.

**Waa muhiim in la ogaado in isbeddelalda sharciga aanay sabab u ahayn isbeddelka amarkaaga jira**. Si loogu sameeyo isbeddel amarka *Xeerka Furriinka*, kooxuhu waa inay muujiyaan inuu jiray isbeddel muhiim ah oo noloshooda ah ama midka ilmahooda. Tan waxaa loogu yeedhaa "isbeddelka duruufaha" xagga Xeerka. **Isbeddelada *Xeerka Furriinka* ma aha isbeddelka duruufaha**.

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan arag: "Qaban qaabada daryeelka waalidka dhanka amarada ama heshiisyada la gaadhay ama la beddelay ka dib sharciga cusub intii uu dhaqan galay".

## Qaban qaabada daryeelka waalidka ee amarada ama heshiisyada la gaadhay ama la beedelay ka dib sharciga cusub intii uu dhaqan galay.

shuruudaha *Xeerka Furriinka* cusub ee daryeelka waalidka waxa uu xoogga saaraya masuuliyadaha waalidka ee carruurtooda iyo hawlaha looga baahan yahay daryeelka carruurta.

**Haddii aad raadineyso inaad hesho amar qaban qaabo waalidnimo ama bedesho** amar ilaalin iyo marin-u-helid jira ama heshiis la sameeyey ka hor Maarso 1, 2021, macluumaadka soo socda ayaa ku khuseeya.

Shuruudaha ilaalinta iyo marin-u-helidda ee *Xeerka Furriinka* waxa uu isbeddelay Maarso1, 2021. Fadlan maanka ku hay:

- **Wixii ah amarada maxkamadda ama heshiisyada la gaadhay ka dib Maarso 1, 2021:** sharciyada cusub ee *Xeerka Furriinka* ayaa lagu dabaqaa.
- **Wixii ah amarada maxkamadda ama heshiisyada la gaadhay ka hor Maarso 1, 2021:** waxaad sii wadi kartaa inaad ku tiirsanaato amarkaaga maxkamadda ee jira ama heshiiska. Haddii aad doonayso inaad beddesho amarka maxkamadda ama heshiiska **kaas oo la gaadhay ka hor Maarso 1, 2021**, Sharciyada *Xeerka Furriinka* cusub ayaa la adeegsan doonaa.
- **Isbeddelada sharciga sabab uma aha isbeddelka amarkaaga jira.** Si loogu sameeyo isbeddel amarka *Xeerka Furriinka*, kooxuhu waa inay muujiyaan inuu jiray isbeddel muhiim ah oo noloshooda ah ama midka ilmahooda. Tan waxaa loogu yeedhaa "isbeddelka duruufaha" dhanka Xeerka. **Isbeddelada *Xeerka Furriinka* ma aha isbeddelka duruufaha.**

## Qaban qaabooyinka daryeelka waalidka

Qaban qaabada daryeelka waalidku waa qorshaha adiga ama maxkamaddu ay u samayso daryeelka carruurtaada ka dib marka aad kala maqantihiin ama is furtaan. Tan waxaa ka mid ah qaban qaabada ku saabsan halka carruurtu ay ku noolaan doonto, iyo cidda ka masuul ahaan doonta go'aamada wayn ee ku saabsan arrimaha sida halka carruurtu ay dugsiga u aadi doonaan, waxbarashadooda diinta (haddii ay wax jiraan), daryeelkooda caafimaadka, iyo wixii la midka ah.

*Xeerka Furriinka* waxa uu leeyahay sharciyo ku saabsan qaban qaabada daryeelka waalid ee waalidiinta is fura. Gobolada iyo dhulalka guud ahaan waxay leeyihiin sharciyo isku mid ah dhanka waalidka aan xaaska ahayn iyo waalidka xaaska ah ee kala maqan laakiin aan dalban furriin. Sharciyada gobolkaaaga ama dhulku waxa uu isticmaali karaa erayo kale si loo tixraaco habbaynta daryeelka waalidka.

## Nidaamyada xalka khilaafka qoyska

Nidaamka xalka khilaafka qoyska waa nidaam **dibadda ka ah** maxkamadda oo ay isticmaalaan kooxaha xagga sharciga khilaafka qoyska si la isugu dayo in la xaliyo dhibaatooyin kasta. Waxaa ku jira wada hadalka, dhexdhexaadinta iyo sharciga wada shaqaynta.

Waxaa jira faa'iidooyin badan xagga xallinta dhibaatooyinka si heshiis ah, halkii lagu xallin lahaa dhanka dacwadaha maxkamadda. Xalka khilaafka ka baxsan maxkamadda wuu ka qiima jabnaan karaa oo ka wakhti yaraan karaa, oo kooxaha inta badan waxay u haystaan maamul badan go'aamada la gaadhayo ee ku saabsan noloshooda. Waalidku inta badan meel fiican ayay joogaan si ay u gaadhaan go'aamo ku saabsan carruurtooda sababtoo ah si wanaagsan ayay iyaga u yaqaanaan.

Shuruudaha *Xeerka Furriinka* cusub waxay ku dhiirgeliyaan waalidka inay isticmaalaan nidaamyada xalka khilaafka qoyska si ay u caawiyaan xoog saarida danaha carruurtooda oo waxay isku dayaan inay xalliyaan khilaafkooda goor hore iyo meel dibadda ka ah maxkamadda. Waalidku waxay leeyihiin **waajib** cusub si ay u xalliyaan khilaafkooda dhanka nidaamyada xallinta khilaafka, laakiin keliya haddii ay ku habboonaato. Nidaamyadan waxa dhici karta inaanay haboonaan xaaladaha qaarkood, sida halka ay ka jirtay rabshadda qoyska. Haddii aad la kullantay rabshadda qoyska, waa inaad si feejigan uga fekertaa haddii nidaamyada xalka khilaafka qoyska ay adiga kugu habboon yihiin.

Waxaad yeeli kartaa inaad qareen la hadasho ama dhexdhexaadiye waxa ku saabsan doorashooyinka xalka khilaafka qoyska loogu talo galay inay caawiyaan ilaalinta dadka la kulmay rabshadda qoyska.

**Macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan rabshadda qoyska fadlan eeg Samaynta Qorshayaasha.**

## Waajibaadka Waalidka

Waalidka iyo kuwa kale ee dalbada amarada waafaqsan Xeerka waxa ku waajib ah inay:

- Ku dhaqmaan wakhtiga daryeelka waalid, masuuliyadaha go'aan qaadashada, ama la xidhiidhaan ilmaha si waafaqsan amarka xidhiidhka, qaab waafaqsan danaha ugu fiican ee ilmaha.
- Ka ilaaliyaan carruurta kicinta khilaafka ka yimaadda dacwada.
- Marka ay habboon tahay, isku day inaad ku xalliso arrimaha dhanka nidaamka xalka khilaafka qoyska.
- Bixi macluumaad dhammaystiran, sax ah oo la cubooneysiiyey sida loogu baahdo ee waafaqsan *Xeerka Furriinka*.
- U hogaansan amarada maxkamadda ilaa aanay noqon dhaqangal.

## Danaha ugu fiican ee ilmaha

Waxaad aqbali kartaa nooc kasta oo qaban qaabada daryeelka waalid ah, laakiin waxaad u baahan tahay inaad xoogga saarto waxa tahay danaha ugu fiican ee carruurtaadu. Haddii aanad aqbali karin qaban qaabada daryeelka waalidka oo uu garsoore go'aan kuu gaadhayo adiga, go'aanka garsoorahu waa inuu ku salaysnaadaa **keliya** danta ugu fiican ee ilmaha.

### Ma jiraan fikrado la iska sii rumaysto

Sharcigan cusub **kuma** jiraan wax fikrado la iska rumaystay oo ku saabsan qaban qaabooyinka daryeelka waalidka sababtoo ah dhammaan go'aamada daryeelka waalid ee ku saabsan carruurta waxay ku salaysan yihiin **keliya** danaha ugu wanaagsan ee ilmaha gaarka ah. Tusaale ahaan, sharciga cusub kama koobna wax male ah in waalidku ay leeyihiin qaddar siman oo wakhti ah oo carruurtooda ay joogaan.

## Asbaabaha danaha ugu fiican

Shuruudaha *Xeerka Furriinka* ee cusub waxaa ka mid ah liiska asbaabaha si loo go'aamiyo danaha ugu fiican ilmaha si loo caawiyo waalidka, xirfad yaqaannada cadaalada qoyska iyo garsoorayaasha inay go'aan ka gaadhaan waxay tahay danta ugu wanaagsan ilmaha ee dacwad gaar ah.

### *Tixgelinta muhiimka ah*

Shuruudaha cusub ee xeerku waxay sheegayaan in maxkamaddu ay bixinayso **tixgelinta muhiimka ah ee ilmaha jidha ahaan, dareen ahaan iyo badbaadada cilmi nafsiyeed, amniga iyo fayo qabka**.

Tan macnaheedu waxa weeye badbaadada ilmahaaga, amniga iyo fayo qabka inay yihiin waxa ugu muhiimsan ee ay maxkamaddu ku xisaabtami doonto.

### *Asbaabaha Kale:*

Maxkamaduhu waa inay sidoo kale tixgeliyaan tiro asbaabo ah, sida ta ilmaha:

- baahiyahiisa, xagga da'dooda iyo marxaladda korriinka, sida baahida degenaanshaha
- xidhiidhka ay la leeyihiin waalid kasta
- xidhiidhka ay la leeyihiin walaalaha, ayayda ama awowga iyo dadka kale ee muhiimka u ah noloshooda
- maaraynta daryeelka ka hor kala maqnaanshaha iyo qorshayaasha mustaqbalka ee daryeelka ilmaha
- aragtiyaha iyo dookhyada
- dhaqanka, luqadeed, diimeed iyo korriinka ruuxiyeed iyo dhaxalka, ay ku jiraan soo korinta sida dadka asal ahaan loogu yimid iyo dhaxalka.

Asbaabaha kale maxkamaddu ay ka tixgelineyso waxaa ka mid ah kartida waalid kasta iyo u diyaar ahaanshaha:

- in la daryeelo ilmaha
- taageerada xidhiidhka ilmaha ee waalidka kale
- la shaqeynta iyo kala xidhiidhka ku saabsan arrimaha daryeelka waalidka

Maxkamaddahu sidoo kale waxay tixgeliyaan arrimaha saamayn kara badbaadada ilmaha sida:

- rabshad kasta oo qoyska ah iyo saamaynta ay ku leedahay
    - kartida u diyaar ahaanshaha qof kasta oo ka qayb qaatay waxka qabashada rabshadda qoyska si loo daryeelo loona buuxiyo baahiyaha ilmaha, iyo
    - habboonaanta samaynta amarka u baahanaha in la iska kaashado arrimaha saamaynaya ilmahaaga
- dacwadda jirta ee madaniga ah ama falka dembiga, amarka, xaalada, ama tallaabada la xidhiidha badbaadada, amniga iyo fayo qabka ilmaha.

**Xusuuso:**

- Tani maaha liis xidhan. Waalidka iyo maxkamaddu waxay tixgelin karaan **sabab kasta** oo khuseysa duruufaha ilmaha.
- Ahmiyadda sabab kasta waxay ku xidhan tahay xaaladda gaarka ah ee ilmahaaga. Laakiin badbaadada ilmaha, amniga iyo fayo qabka waa walaaca koowaad.

## Tixgelinno kale

Garsoorahu sidoo kale waxa uu adeegsan doonaa mabada'a ah in ilmahu uu la yeesho xidhiidh badan waalid kasta sida danaha ugu fiican ee ilamaha. SI kastaba ha ahaatee, maxkamaddu waa inay tixgelisaa jidhka ilmaha, dareenka iyo badbaadada cilmi nafsiyeed, amniga iyo fayo qabka, **wax ka badan mid kastoo kale**. Tani gaar ahaan waxay ahaan doontaa mid muhiim u ah xaaladaha rabshadda qoyska.

Qofka anshaxiisa hore ama dhaqanka laguma xisaabin karo haddii aanay ku habooneyn falidda daryeelka, masuuliyadaha go'aan qaadashada ama xidhiidhka lala leeyahay ilmaha.

## Amarada waalidnimada

Qaban qaabooyinka waalidnimada la sameeyay ama la cusboonaysiiyay ka dib sharciga cusub intaanu dhaqan gelin, maxkamaduhu waxay magacaabayaan go'aan qaadasho masuuiyadda iyo wakhtiga waalidnimada iyadoo loo maraayo amarka waalidnimada, taasoo ku salaysan keliya danaha ugu fiican ee ilmaha.

### Wakhtiga waalidnimada

Wakhtiga waalidnimada waa marka aad ka masuul tahay ilmahaaga. Tan waxaa ka mid ah wakhtiga ilmahaagu aanu jidh ahaan ku jirin daryeelkaaga, sida marka ilmahaagu joogo dugsiga ama daryeelka xannaanada.

Qof kasta oo leh wakhti waalidnimo waxa uu gaadhi karaa go'aan maalin ilaa maalin ah oo ku saabsan ilmaha marka ilmahu uu ku jiro daryeelkooda, haddii aanay maxkamaddu si kale u amrin. Go'aamada maalin ilaa maalin waxaa ka mid ah arrimaha sida wakhtiga hurdada ilmaha iyo cuntooyinka.

### Masuuliyadda go'aan qaadashada

Sharciga cusub waxa uu soo bandhigaa fikradda "masuuliyadda go'aan qaadashada" sida masuuliyadda samaynta go'aamada waa wayn ee ku saabsan fayo qabka ilamaha. Tan waxaa ka mid ah go'aamada ku saabsan imahaaga ee:

- caafimaadka
- waxbarashada
- luqadda, dhaqanka, diinta, ruuxiga
- hawalaha muhiimka ah ee ka baxsan manhajka.

Kuwan waa tusaalooyinka. Masuuliyadaha go'aan qaadashada waxaa ka mid ah lahaanshaha awoodda si loo gaadho go'aanno kasta oo muhiim ah oo la xidhiidha fayo qabka ilmahaaga.

## Amarada xidhiidhka

Guud ahaan, xidhiidhka u dhexeeya ilmaha iyo kuwa kale sida ayayda/awowga ama xubnaha qoyska ballaadhan waxa uu dhici doonaa muddada wakhtiga waalidnimada.

Maxkamaddu waxay samayn kartaa amarka xidhiidhka halka aanay suuragal ahayn inay dhacdo muddada wakhtiga daryeelka waalidka, waana danta ugu fiican ee ilmaha. Xaaladdan, amarka xidhiidhka waxa uu u oggolaanayaa kuwa aan xaaska ahayn iyo ilmahu inay booqdaan ama wada xidhiidhaan.

**Kumaa codsan kara daryeelka waalidka ama amarka xidhiidhka:**

- Labada xaas, waalidka ama qof kasta oo hadda ku jira ama raadinaya doorka waalidka xagga nolosha ilmaha, waxa uu codsan karaa **amarka daryeelka waalidka**. Kuwa aan xaasaska ahayn waxay u baahan yihiin inay raadiyaan "fasaxa" maxkamadda si ay u codsadaan amarka daryeelka waalid. Tan macnaheedu waxa weeye inay u baahan yihiin oggolaanshaha maxkamadda.
- Keliya kuwa aan xaaska ahayn ayaa codsan kara **amarka xidhiidhka**. Waa inay helaan oggolaanshaha maxkamadda si ay u keenaan codsiga.

## Qorshayaasha daryeelka waalidka

Marka go'aanka laga gaadhayo danaha ugu fiican ee ilmaha, maxkamaddu waxay tixgelin doonta sida adiga iyo waalidka kale aad u qorshaynaysaan inaad daryeeshaan ilmahaaga.

Sharciga cusub waxa uu ku dhiirigeliyaa waalidka inay sameeyaan qaban qaabooyinka daryeelka waalidka sida ugu yar ee soo faragelinta maxkamadda ee suurtagalka ah. "Qorshaha daryeelka waalid" waa agabka waalidka, dhexdhexaadiyayaasha iyo garyaqaanadu ay isticmaalaan si ay u go'aamiyaan sidii ay waalidku u wadaagaan masuuliyadaha ka dib kala maqnaashaha iyo furitaanka.

Qorshaha waalidku waxa dhici karta inuu noqdo mid guud, si fudud u dejinta jadwalka marka ilmahaagu uu ku jiri doono daryeelka waalidka iyo cidda gaadhi doonta go'aanka ku saabsan ilmaha. Waxay sidoo kale ahaan kartaa mid aad gaar ugu ah, dejinta aagagga la qeexay go'aan qaadashada masuuliyad waalid kasta, jadwalada faahfaahsan ee hawalaha ilmaha iyo fasaxyada, wada xidhiidhka, safarka iyo qaybaha kale ee daryeelka ilmaha.

Haddii labada waalid ay isku raacaan qorshaha daryeelka waalidka, sharciga cusub waxa uu u baahan yahay in maxkamadu ku darto shuruudaha daryeelka waalidka ama amarka xidhiidhka, haddii aanay ahayn danta ugu fiican ee ilmaha.

**Wixoo macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan qorshayaasha daryeelka waalidka, fadlan eeg agabyada onlaynka ah ee soo socda ee websaydka Waaxda Cadaaladda Kanada ee ka caawiya waalidku inay horumariyaan qorshaha daryeelka waalid:**

- **Liiska magacyada Qorshaha Daryeelka waalidka**

Agabkani waxa uu muujiyaa arrimaha la tixgelinaayo marka la horumarinayo qorshaha daryeelka waalidka.

- **Agabka Qorshaha Daryeelka waalidka**

Ilahan waxaa ka mid ah Qaabka Qorshaha Daryeelka waalidka si loo kobciyo qorshaha daryeelka waalidka ee la gaar yeelay.

## Adeegyada cadaaladda qoyska

Adeegyada cadaaladda qoyska miduun waa adeegyo guud ama gaarka ah oo loogu talo galay inuu ka caawiyo dadka inay wax ka qabtaan arrimaha kasoo baxa kala maqnaanshaha ama furitaanka. Gobolada iyo dhulalku waxay leeyihiin adeegyada cadaaladda qoyska sida dhexdhexaadinta iyo kullamada macluumaadka daryeelka waalidka ee aad ka heli karto waxtar badan. Waxaad ka heli kartaa adeegyada caawinta badan ee kale websaydka dowladaadda gobolka ama dhulka. Si waafaqsan Xeerka cusub, la taliyayaasha sharciga waxaa waajib ku ah inay ku wargeliyaan macaamiisha adeegyada cadaaladda qoyska taas oo caawimo u noqon karta iyaga.

## Linkiyada la xidhiidha

- Samaynta Qorshayaasha: hagitaanka qaban qaabada daryeelka waalidka ka dib kala maqnaanshaha ama furitaanka
- Liiska magacyada qorshaha daryeelka waalidka
- Helidda qorshaha daryeelka